

Helid Siman ee Adeegyada DSHS

Haddii aad leedahay naafanimo caafimaad amase maskaxeed amase arrin la xiriirta akhris-qoraal amase waxbarasho, waxaanu qaadnaa tallaabooyin dheeraad ah amase si duwan baan wax u qabannaa si aan kaaga caawinno inaad hesho amase aad sii heysato adeegyadayada. Caawimadda aan bixinnaa waxay ku dhisan tahay adiga baahidaada.

Waxaan kaa codsan doonnaa adiga taageeradaada sii aan u oggaanno sida ugu fiican ee aan kuu caawin karno. Si aad u hesho waxtar, maaha inaad ka jawaabto su'aalo ku saabsan Helintaanka Siman.

Waqti kasta waad na warsan kartaa caawimo dheeraad ah

Haddaad u baahan tahay caawimo dheeraad ah, waannu kula shaqeyn doonnaa adiga si aan u diyaarinno qorshe Helitaan Siman.

Waxaannu ku siin doonnaa nuqul qorshahaaga Helitaan Siman. Waxaan kaloo aan nuqul siin karnaa kuwo kale oo adiga kaa caawin kara inaad hesho adeegyadayada.

Waa kuwan siyaabaha aannu kuwa u baahan u siin karno caawimo dheeraad ah:

- ✓ Caawimo buuxitaan foomamka Waaxda Adeegyada Caafimaadka iyo Bulshada (DSHS)
- ✓ Waxaad diyaarsataa qalab caawimo dhageysi, tarjumayaal ah luqad calaamadeed, ama kaaliyayaal kale oo isgaarsiin
- ✓ Foomamka iyo warqadaha oo si waaweyn u daabacan ku soo dir si elektaroonik ah amase qaab kale
- ✓ Akhris iyo fasiraad warqadaha amase foomamka aan soo dirno
- ✓ Caawimo inaan helno macluumaadka aan u baahan nahay taariikhda aan u baahan nahay
- ✓ U dirno nuqullo warqadaha amase la xiriirno qof adiga ku caawiya
- ✓ U oggolaanno qof aad dooratay innuu mas'uul ka noqdo lacagtaada kaashka ah, cuntadaada, iyo/amase wxtarkaaga caafimaad
- ✓ Ku siinno waqti dheeraad ah inaad noo soo jawaabto amase aad na siiso macluumaad Macluumaad
- ✓ Na soo wac haddii aad xafiiska ka iman laheyd
- ✓ Adiga kugula kulmi doonnaa qol aan laheyn wax ku dhaga-barjeeya
- ✓ Ku soo wici doonnaa inta aanaan wax kuu diidin amase joojin amase yareynin wxtarkaaga iyo, haddii aad diidan tahay go'aankayaga, kaa caawin doonnaa inaad codsato dhegeysi iyo/amase codsato in la sii wado wxtarka
- ✓ Ku xasuusin doonnaa ballanada
- ✓ Kula soo xiriiri doonnaa haddii aad gafto ballan amase taariikh wax lagaa sugayey
- ✓ Dib-u-eegi doonnaa go'aannada joojinta amase yareynta wxtarrada si aan u hubinno in la raacay qorshahaaga Helitaan Siman
- ✓ KU siinno caawimo kale oo aad u baahan tahay inaad hesho amase haysato adeegyadayada

Sharciyada aan raacno xagga Helitaan Siman waa kuwa Sharci Maamuleedka Dawladda Washington (WAC) 388-472-0010 Illaa -0050 Qoddobka Meeleynta Taageero loo Baahan yahay.